

Xoojinta iyo taageerista bulshooyinka

Janaayo 18, 2024

Dawlada Alberta waxay bilawday laba barnaamij oo deeq bixineed si ay utaageerto hindisayaasha abuuraya bulsho kala duwan, loo dhan yahay, iyo ka hortagga isir nacaybka.

Diisambar 2023-kii, dawladu waxay ukala saartay barnaamijka Deeqbixinta ee Dhaqamada kala Duwan iyo Ka Hortagga Isir nacaybka laba barnaamij, oo kala ah barnaamijka Deeqda Isir-dhaqameedka iyo barnaamijka Deeqda Ka Hortagga Isir nacaybka. Kala saaridu waxay ka dhalatay talo ka timi Guddida Ka Talobixinta Ka Hortagga Isir Nacaybka ee Alberta waxayna si wacan u taageeri doontaa dadaalada kala duwanaanshaha, udhannaanshiyaha iyo dhaqamada badan. Labada barnaamij deeqbixineedba hadda waa ay furanyiin codsiyadana waa lasoo gudbisan karaa.

“Dawladayada waxay ku ballan qaadaysaa inay dhisto gobol loo dhan yahay. Barnaamijyadan deeq bixineed ee cusub waxay taageeri doonaan hindisayaasha dhaqamada badan, dadka dhaladka ah iyo bulshooyinka Métis kuwaasoo udabaal dagaya doora ay ku leeyihiin bulshada iyo badhaadheheena dhammaanteen, waxa uu sidoo kale caawin doonaan ja hadalka arrimaha isir nacaybka iyo takoorka si loo abuur bulsho duqaad leh loona dhan yahay.”

Muhammad Yaseen, Wasiirka Socdaalka iyo Dhaqamada Badan

Marka ay bulshada Alberta sii noqoto bulsho kala duwan, waxaa mihiim ah inay dawladu kor uqaado faa'idooyinka iyo qiimaha dhaqamada kala duwan iyo isku xidhka dhaqamada kala duwan ee bulshooyinka Alberta gudaheeda oo wax ka qabanaya arrimaha isir nacaybka iyo cunsurinimada. Barnaamijyada deeq bixinta ee cusub waxa uu ka caawinayaa ururada uqalma inay abuuraan barnaamijyo ugaar ah arrimaha iyo tabashooyinka bulshooyinkooda.

- Barnaamijka Deeq Bixinta ee Isir-dhaqameedka waxa uu taageerayaa hindisayaasha bulshada kor uqaadaya kala duwanaanshiyaha dhaqamada Alberta abuurayaha udhannaanshiyo, oo ay ka mid tahay ka taageerista ururada bulshada dhaladka ah inay udabaal dagaan wadaagaana dhaxalkooda taariikheed ee qaniga ah.
- Barnaamijka Deeq Bixinta ee Ka Hortagga Isir nacaybka waxaa loogu talo galay in lagu kordhiyo wacyiga ku wajjahan isir nacaybka, saamaynaheeda iyo caqabadaha ay waajahayaan kooxaha la takooro, iyo si loo taageero hindisayaasha ka hortagga isir nacaybka ee ay hoggaminayaan bulshadu.

Xaqiiqooyin kooban

- Miisaaniyada 2023 waxay uqoondaysay \$8 milyan muddo saddex sanno ah barnaamijka Deeq Bixinta Isir-dhaqameedka iyo \$1.5 milyan muddo saddex sanno ah barnaamijka Deeq Bixinta Ka Hortagga Isir nacaybka.
- Barnaamijka Deeqaha Isir-dhaqameedka waxa uu leeyahay laba kooxood:

- Kooxda 1 waxaa loogu talo galay mashaariicda u abuurta fursado isku xidhnaanshiyaha dhaqamada kala duwan kuwaasoo loogu xidhmayo kooxaha dhaladka ah iyo isir-dhaqameedyada (maalgelin gaadhaysa illaa \$50,000).
- Kooxda 2 waxaa loogu talo galay mashaariicda abuurta fursado loogu dabbaal dagayo kala duwaanshaha (maalgelin gaadhaysa illaa \$15,000).
- Deeqda Ka Hortagga Takoorka waxay ka hawl gashaa laba kooxood oo leh ujeedooyin gaar ah:
 - Kooxda 1 waxaa loogu talo galay in kor loogu qoodo wacyiga ku wajjahan isir nacaybka iyo saamaynta isir nacaybka ay waajahaan dadka dhaladka ah iyo kooxaha la haybsooco. Mashaariicda waafaqsan ugu yaraan hal natiijo oo ujeedooyinka barnaamijka mid uun ah tanoo baraysa reer Alberta saamaynta takoorku leeyahay ama awood usiinaysa ururada inay xoojiyaan awoodooda ay ku taageerayaan mashaariicda ka hortagga isir nacaybka waxay uqalmaan ilaa \$5000 oo maalgalin ah.
 - Kooxda 2 waxa uu taageerayaa mashaariicda ka hortagga isir nacaybka ee ururada bulshada. Mashaariicda waafaqsan ugu yaraan hal natiijo oo ujeedooyinka barnaamijka mid uun ah tanoo baraysa reer Alberta saamaynta isir nacaybku leeyahay ama awood usiinaysa ururada inay xoojiyaan awoodooda ay ku taageerayaan mashaariicda ka hortagga isir nacaybka waxay uqalmaan ilaa \$10,000 oo maalgalin ah.
- Intii udhaxaysay 2022-23, barnaamijka Deeqda Ka Hortagga Isir nacaybka iyo Dhaqamada Badan waxa uu siiyay \$3.63 milyan illaa 130 ururada bulshada si loo kordhiyo wacyiga dhaqamada kala duwan loogana hortago loolana tacaalo isir nacaybka.

Macluumaadka la xidhiidha

- [Deeqda Ka Hortagga Isir nacaybka](#)
- [Deeqa Isir-dhaqameedka](#)

Su'aalaha warbaahinta

Michael Kwas

michael.kwas@gov.ab.ca

780-264-5368

Xoghayaha Saxaafada, Socdaalka iyo Dhaqamada Kala Duwan